# Bayaanka Xuquuqda Guriga Daryeelka ee Minnesota iyo Federaalka Midaysan

## Bayaanka Xuquuqda Bukaanka ee Minnesota KU QEEXAN XEERARKA MINNESOTA, QAYBTA 144A.751

Luqadda farta **ADAG** ku daabaacan waxa ay meteleysaa macluumaad dheeraad ah ee xuquuqda rukunka ee sida u qorayo sharciga federaalak ee loogu talgalay bukaannada Guriga Daryeelka ee Medicare shahaadaysay.

Qaybhoosaadka 1. Qaraarka xuquuqda. Shakhsiga daryeelka guriga lagu siinayo waxa uu xaq leeyahay:

**In laga warhayo xuquuqdiisa ama xuquuqdeeda, iyo ay shardi ku tahay guriga daryeelka in uu difaaco iyo hormariyo isticmaalka xuquuqdaan.**

(1) **Adeegsashada xuquuqdiisa ama xuquuqdeeda bukaan ahaanta guriga daryeelka.** La siiyo macluumaad qoraal ah ee xuquuqda ku taxluqa inta si hordhac ah lagu bilaabin xanaanada guriga ama inta lagu jiro booqashada qiimeynta ee ka horreysa guriga daryeelka, ay ku jirto waxaa dhacaya haddii xuquuqda la jabiyo.

**Ogaysiiska xuquuqda iyo waajiibaadka: (1) Muddada booqashada qiimeynta hore lagu jiro ee ka horreysa inta aan daryeelka la bixin, guriga daryeelka waxaa shardi ku ah in uu siiyo bukaanka ama wakiilka war (hadal ahaan) iyo ogaysiis qoraal ah ee bukaanka xuquuqdiisa iyo**

**waajibaadkiisa luqad ama qaab uu bukaanka wax ku fahmayo; (2) guriga daryeelka waa in uu adeeco shuruudaha ku jira qaybhoosaadka I (subpart I) ee qayb ka ah Koodka Shuruudaha Federaalka (Code of Federal Regulations (CFR) 489) cutubkaan dardaaranka la xariira. Guriga daryeelka waxaa shardi ku ah in uu u sheego iyo u qeybiyo macluumaadka qoraalka ah bukaanka ee la xariira shuruudaheeda dardaaranka, ay ku jirto warbixin sharciga Gobolka loo adeegsanayo; (3) Guriga daryeelka waxaa shardi ku ah in uu helo bukaanka ama wakiilka saxiixiisa lagu hubinayo in asaga ama ayada ay heleen ogaysiiska xuquuqda iyo wajiibaadka.**

(2) La siiyo daryeelka iyo adeegyada sida uu qorayo qorshaha guriga daryeelka ee ku habboon iyo dhawraya heerarka guriga daryeelka iyo qayb libaax ka qaato dhisidda iyo baddalidda qorshaha iyo daryeelka iyo adeegyada lagu qiimeeynayo. **Ka qaybqaato dhisidda qorshahiisa ama qorshaheeda guriga daryeelka.**

(3) In si horraansho ah loogu sheego inta aan adeegyada daryeelka la siin waxa ku taxluqa adeegyada la siin doono, anshaxa adeegyada lagu bixinayo, inta ay noqonayaan tirada booqashooyinka la soo jeediyay, fursadaha kale ee u furan, iyo saamaynta xuulashooyinkaan, ay ku jiraan saamaynta ay yeelan karto diidmada adeegyadaan.

(4) In si horraansho ah loogu sheego, marka ay suurtogal tahay, wax kasta ee isbaddal ah ee qorshaha rugta daryeelka iyo qayb libaax laga qaato wax kasta ee isbaddal ah.

(5) Diido **daryeelka,** adeegyada ama daawaynta.

(6) Ogaado, inta ka horreysa, xaddidaad kasta ee adeegyada jira ee daryeelaha laga helayo, iyo waxa uu daryeelaha ku saleeyay joojinda adeegyada. **La helo macluumaad ku taxluqa ujeeddada adeegyada uu guriga deryeelka bixin doono iyo xaddiidaadyada adeegyadaas.**

(7) Ogaado si horraansho ah helitaanka adeegyada haddii adeegyada guriga daryeelka ay dhici karto in ay kabayaan caymiska, gargaarka caafimaadka, Medicare, ama barnaamijyo kale kuwaaso uu bukaanku ku qoranyahay. **La siiiyo macluumaadka adeegyada ku taxluqa ee leh caymiska nacfiga guriga daryeelka.**

(8) La siiyo, marka la codsado, qiyaas daacadnima ah ee dib u bixinta uu daryeelaha filayo in uu ka helayo qorshaha caafimaadka shirkadda ee bukaanka uu ka tirsanyahay. Qiyaasta daacadnimada waxaa shardi ah in loo gudbiyo marka uu sidaasi ku codsado shakhsiga aan ku jirin qorshaha caafimaadka shirkadda. Macluumaadka lacag-bixintaan ma noqonayo heshis sharci salka ku haya qiyaasidda kharashyad aadeegyada.

(9) Ogaado in ay jaalliyadda ka jiri karaan adeegyo kale, ee dhammaadka nolosha iyo daryeelayaal kale ee guriga daryeelka, iyo ogaado meesha uu aadayo si uu ku helo adeegyadaan.

(10) Si xor ah uu u doorto daryeelayaasha jira iyo baddasho daryeelayaasha kaddib marka adeegyada ay bilaabeen, ku xadidan inta ay oggolyihiin caymiska caafimaadka, gargaarka

caafimaadka, Medicare, ama barnaamijyo kale. **Dhakhatarkiisa ama dhakhtarkeeda rasmiga doorato.**

(11) Macluumadka shakhsi ahaanshaha, dhaqaalaha, iyo caafimaadka la asturo iyo in loo sheego daryeelaha shuruudihiisa iyo nidaamayadiisa quseeya siidaytna macluumaadkaa.

(12) Loo oggolado helitaanka xogta iyo macluumaadka qoraalka ku jira xogta sida ay ku xusanyihiin qaybaha 144.291 illaa 144.298. **Si asturan lagu siiyo xogta daawaynta. Helitaanka ama siidaynta macluumaadka bukaanka iyo xogta daawaynta la oggolayahay marka la raaco 45 CFR qaybaha 160 iyo 164.**

(13) Ay la tacaalaan dad tababar fiican haysta iyo hawlahooda si karti u leh u gudanaya.

(14) Lagula dhaqmo si mudnaan iyo xushmad leh iyo waxa uu bukaanka leeyahay si fiican loo dhawro. In shakhsi ahaantiisa ama waxa uu leeyahay si fiican loo dhawro.

(15) Sheegto cabashooyinka quseeya daawaynta iyo daryeelka, ama noqon waayaa, la siiyo ama la xariira mudnaan ama xushmo la'aan bukaanka loo geysanayo ama waxa uu leeyahay uu u geysanayo **qof kasta ee adeegyada ku bixinaya magaca rugta daawaynta.**

**Bukaanku waxa uu xaq u leeyahay in aan lagula dhaqmin takoorid ama aargudasho marka uu sheegto/ay sheegato xuquuqdeeda ama xuquuqdiisa.**

(16) Xor ka ahaado xadgudubka jirka iyo qaylada. **Xor ka ahaado xadgudubka silica, dayaca, ama qaylada, maskaxda, galmada, iyo jirka, ay ku jiraan dhaawacyada aan la ogayn cidda geysatay, iyo boobka hantida bukaanka.**

(17) Si caqligal ah, loo sii sheego isbaddallada ku soo fool leh adeegyada iyo kharashyada, ay ku jiraan in loo sii sheego toban cisho ka hor ogyasiis joojinta adeegyada uu daryeelaha bixiyo, marka laga reebo xaalado sida:
(i) rukunka adeegyada la siinayo uu ku kaco dhaqan isbaddal weyn u geysanaysa xaaladda shaqo ee ka dhaxaysa rugta daawaynta iyo shakhsiga adeegyada daawaynta rugta ka bixinaya, ama abuuraya jawi xadgudub leh ama halis u shakhsiga adeegyada daawaynta rugta bixinaya;
(ii) xaalad degdeg ee daryeelaha aan rasmiga soo foodsaarta ama isbaddal weyn ee rukunka xaaladdiisa ay sababayso in la bixiyo adeegyo aan lagu bixin karin heshiiska hadda jira iyo in uusan daryeelaha guriga daryeelka qancin karin; ama
(iii) rukunka waxa uu ka baxay xaaladda rasmiga ah ee bukaan si ba’an u jirran.

(18) Xaq u leeyahay in uu helo wareejinta isuduwan marka ay dhacdo in uu isbaddal ka dhaco adeegyada uu daryeelaha bixin doono.

(19) Yaqaanno sida lagula xariirayo shakhsi la shaqeeya daryeelaha ee masuul ka ah xallinta mushkiladaha iyo in uu daryeelaha baaro iyo iskudayo xallinta cabashada ama ashtakada.

(20) Yaqanno magaca iyo cinwaanka ee hay’adda gobolka ama degmada si uu ugula xariiro macluumaad ama gargaar dheeraada.

(21) Shakhsi ahaan xuquuqdaan ku adkaysado, ama uu ku adkaysto rukunka qoyskiisa marka bukaanka lagu sheegay qof aan masuuliyad iska qaadi karin, aargoosashada ka reebantahay. **Haddii bukaanka lagu sheegay in uusan masuuliyad qaadi karin sida uu qorayo sharci gobol in maxkamad ay si sharci ah ugu go’aamisay, xuquuqda bukaanka uu leyahay waxaa lagu wareejinayaa qofka loo magacaabay sida uu qorayo sharciga gobolka inuu difaaco bukaanka danahiisa. Haddii ay maxkmad gobol aysan xukmin in bukaanku uusan masuuliyad qaadi karin, qof kasta ee wakiil rasmi u ah ee uu bukaanka magacaabay ayadoo la raacayo sharciga gobolka waxa uu awood adeegsan karaa bukaanka xuquuqdiisa in heerka u sharciga gobolka fasaxayo.**

(22) Uu qabo xanuun ama astaamo lagu qaboojinayo heeraarka rabitaanka bukaanka. Helayo xakamaynta xanuun/joogto ah iyo astaamaha oo laga samaynayo guriga daryeelka xaaladaha la xariira jirro loo dhinto.

**Guriga daryeelka waxa shardi ku ah in uu:**
**(i) Hubiyo xadgudubyada idil ee la so jeediyay kuna lug leh silica, dayaca, ama hadalka, dhimirka, galmada, xadgudubka jirka, ay ku jiraan dhaawacyada aan la ogayn cidda geysatay, ama boobka hantida bukaanka oo uu ku kaco qof sharxaadda guriga daryeelka qaabilsan, oo ay soo sheegeen isla markiiba shaqaalaha guriga daryeelka ama shaqaalaha qandarasska lagula galay daryeelka maamulka**

**guriga; (ii) Deg-degga loo baarayo xadgudubyada idil ee ku lug leh adeegyada sharaxaadda oo laga qabto guriga daryeelka iyo tallaabada degdegga ee la qaadi lahaa si looga hortago xadgudubyo kale oo dhici kara inta eedaha xadgudbayda la baarayo. Baarisyada iyo ama qoraal samaynta eedaha xadgudubyada waa in lagu socodsiiyaa si waafaqsan hababka degsan; (iii) La qaado tallaabada saxitaanka habboon ee waafaqsan sharciga gobolka haddii eedaha xadgudubka uu baaro maamule ka socda guriga daryeelka ama guddi kale ee dibadda oo awood sharci u haysta, sida hay'adaha sahanka gobolka ama hay'adda nabadsugidda maxalliga, iyo (iv) La hubiyo xadgudubyada la soo baaray ee la soo gaarsiiyay gobolka guddiga maxalliga ee awood sharci u haysta (ay ku jiraan hay'adda sahanka iyo shahadaynta gobolka u qaabilsan) 5 maalmood gudahood ee maalmaha shaqada ee jiritaanka xadgudubka.**

Haddii daryeel bixiyaha guriga ka hawlgalayo rug la degganyahay, ogaysiiska qoraalka ee deggane kasta ee bukaanka guriga daryeelka waa in uu soo raaciyo lambarka iyo xilalka shaqaalaha, oo ay ku jiraan dadka shaqalaha ah iyo tabarucayaasha, ee uu shaqaaleeyay bixiyaha daryeelka si loo qanciyo shuruudaha MN Rule 4664.0390 kaltan kasta ee ka dhacaya rugta deegaanka guriga daryeelka.

**HADDII AAD CABASHO KA QABTID WAX KU TAXLUQA DARYEELAHA AMA QOFKA BIXINAYA ADEEGYADAADA GURIGA DARYEELKA, WAXA AAD WACI KARTA, U QORI KARTAA, AMA TEGI KARTAA XAFIISKA CAABASHOOYINKA RUGTA, WAAXDA CAAFIAMADKA EE MINNESOTA. WAXAA KALE EE AAD LA XARIIRI KARTAA XAFIISKA SARKAALKA BAARA ASHTAKADA DARYEELKA MUDDADA DHEER AMA XAFIISKA SARKAALKA BAARA ASHTAKADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA IYO NAAFONIMADA KORITAANKA.**

**Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka**
(651) 201-4201
1-800-369-7994
Fakis: (651) 281-9796
**Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:**
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, Minnesota 55164-0970
TDD/TTY: 651-215-8980
**Cinwaaka Xafiiska:**
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
85 East Seventh Place
St. Paul, Minnesota 55164-0970

**Sarkaalka Baara Cabashada Daryeelka Muddada Dheer**
(651) 431-2555
1-800-657-3591
Fakis: (651) 431-7452
**Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:**
Ombudsman for Long-Term Care
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971

**Magaca Shatiilaha:** ______________________________
**Telefoonka:** ______________________________
**Iimeylka:** ______________________________
**Cinwaanka:** ______________________________
**Magaca/Darajada Qofka ay dhici karto in loo dirayo Dhibaatooyinka ama Cabashooyinka:**
______________________________

Ujeeddooyin maclumaad bixin keliya loogamana baanha qoraalka Bayaanka Xuquuqda Daryeelka Guriga: Xeerarka MN, qaybta 144A.751

Qaybhoosaadka 2. **Fasiraadda iyo adkaynta xuquuqda.** Xuquuqdaan waxaa loo dhisay maslaxadda rukumada ee la siinayo adeegyada dareyeelka guriga. Ilaaliyaha ama waliga ama, haddii uusan meesha ka jirin ilaaliayaha ama wailiga, qofka wakiil ahaan loo xilsaaray, ayaa codsan kara in xuquuyadaan la adkeeyo. Daryeelaha guriga daryeelka kama uu codsan karo ama amri karo qofka in uu ka tanasulo mid kasta ee ka mid xuquuqdaan ee shuruud looga dhigayo helitaanka adeegyada. Qaraarkaan xuquuqda ma uu baddalayo ama hoos uma uu dhigayo xuquuqda iyo madax bannanida kale ee ka jira

meesha ay rukumada adeegyada daryeelka guriga ka helayaan, dadka bixinaya adeegyada daryeelka guriga, ama daryeelayaasha shatiga leh ee hoosimaanaya qaybaha 144A.753.

Qaybhoosaadka 3. **Siidaynta.** Koobiga xuquuqdaan waa in la siiyo shaqsi xilliga bilabitaanka adeegyda daryeelka guriga. Koobiga waxaa ku jiri doonaan lambarka cinwaanka iyo telefoonka ee Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka iyo Xafiiska Sarkaalka Baara Ashtakada Daryeelka Muddda Dheer iyo waribixin gaaban ee sharaxaya sida looga xareysanayo xafiisyadaan. Macluumaadka ku taxluqa sida loola soo xaarirayo Xafiiska Sarkaalka Baara Ashtakada Daryeelka Muddda Dheer ayaa la soo raacinaya marka ay jirto ujrada baddaladda daryeelaha iyo ogaysiisyada daryeelayaasha rugta caafimaadka bilaabayaan wareejinta ama joojinta adeegyada.